UNIT 3: WIND AND WATER / WEEK 3

# Home Link - Somali




**Home Links Xirriirinta Guriga Cutubka 3:**
**Dabeysha iyo Biyaha Toddobaadka 3**
Qoysaska Qaaliga ah: Inta lagu jiro cutubkan ilmahaagu wuxuu baran doonaa dabeysha iyo biyaha. Isku day ugu yaraan saddex kamid ah hawlahan waxbarasho ee xiisaha leh, ama dhamaantood samee! Waxa ugu muhiimsan waa inaad ku raaxaysato wakhtiga yar ee uu cunugaagu wax ku baranayo waxa ka dhacaya fasalka. Fadlan midabee sanduuqyada hawlaha aad doorato, kuna soo celi foomkan dugsiga Isniinta soo socota. **XARAABEYSO!**

Magaca Ilmaha: ______________________________

## Luqadda
(La xiriira *Rabbits and Raindrops*)

**Sheeko-sheegid:**
Weydii ilmahaaga inuu kuu sheego sheeko ku saabsan xayawaan. Qor oo kadibna matal.

**Bilaabayaasha Wadahadalka:**

- Waa maxay xayawaanka aad jeceshahay?
- Maxaad jku eceshahay _____(bakaylayaasha)?

## Qorista

**Gabay:** Wada akhriya Tani waa gabay ay tahay in ilmahaagu barto.

**Five Little Owls**
Five little owls in an old elm tree.
Fluffy and puffy as owls could be.
Blinking and winking with big round eyes.
At the big round moon that hung in the sky.
*- Qarsoodi*

## Dhaqdhaqaaqa Weyn

**Dhaqdhaqaaqa Xayawaanka:**

- Raha
- Bisada
- Maska
- Isnaylka

**Bilaawayaasha Wadahadalka:**

- Sidee ayuu ______(rahu) u dhaqaaqaa?
- Miyuu _____(masku) u dhaqaaqaa si dhakhso ah ama gaabis ah?

## Hadal iyo Akhris Wadajir Ah
**(20 daqiiqadood)**

**Lagu bilaawayaasha Wadahadalka:**

- Eeg jaldiga. Maxaad u maleyneysaa in buuggani uu noqon doono?
- Waa maxay qeybta aad ugu jeceshahay sheekada?

## Xisaabta

**Samaynta Kooxaha:**
Weydii ilmahaaga inuu sameeyo koox ka kooban 2 shey. Ka dibna weydii ilmahaaga inuu koox kale sameeyo oo ka badan 2 shey.

**Bilaawayaasha Wadahadalka:**

- Immisa shey ayaa ku jira kooxda koowaad?
- Immisa shey ayaa ku jira kooxda labaad?
- Kooxdee ayaa badan? Sidee baad ku garanaysaa?

# Buug-gelinta Akhrinta

Hubi maalin walba in adiga iyo ilmahaaga aad wada akhrisaan sheeko. Buugagta waxay noqon karaan kuwa ah af Ingiriisi ama luuqada gurigaaga. Booqo maktabadda dadweynaha xaafaddaada si aad u hesho buugaag badan oo ku saabsan dabaysha iyo biyaha!

Isniin ______ Talaado ______ Arbaco ______ Khamiis ______ Jimco ______ Sabti ______ Axad ______

| **Buugaga aan ku akhrino dugsiga**:<br><br>*A Hat for Minerva Louise* qorey Janet Morgan Stoeke<br>*The Snowy Day* qorey Ezra Jack Keats | **Buugaag kale adiga iyo ilmahaaga laga yaabo in aadjeclaataan**:<br><br>*The Mitten* gorey Jan Brett<br>*The Hat* gorey Jan Brett |
| --- | --- |

# Tallooyinka si wadajir ah u akhrinta:

- Wada fadhiista meel xasilloon oo degan.
- Marka aad akhrinayso, iftiimi oo qeex erayada cusub. Tusaale ahaan, “**Sahaminta** macnaheedu waa socodka si loo eego waxyaabaha."
- Marka aad akhrinayso, weydii ilmahaaga su'aalaha ku saabsan buugga. Tusaale ahaan, “Maxaad u xidhataa dibada maalmaha ay qaboobdahay ee uu baraf da'ayo?"